

## **Caafimaadka deegaanka amarka sarkaalka oo karantiil iyo go'doon wax ku ool ah maars 28, 2020.**

Sarkaalka caafimadka degmada King County ayaa soo saaray amar lagu ilaalinayo caafimaadka bulshadeena, kana hortagiyo faafitaanka COVID-19. Amarkaan waxaa loo sameeyay si looga hortago faafitaanka COVID-19 dadka helay natijjooyinka baaritaanka togan ee COVID-19 ama dadka sugaya natijjooyinka baaritaanka. Amarka wuxuu si gaar ah muhiim ugu yahay ka hortagga faafitaanka COVID-19 in badan kusocota xubnaha nugul ee dadweynaha.

### **Tilmaanta karantiil**

Hadii aad leedahay astaamaha COVID-19 (Qandho, qufac iyo neefta oo kugu adkaato) adiga oo sugaya natijjada. **Waa inaad joogta guriga ama aad joogta meel karantiil ah.** Dadka aan hadda haysan guryo, goobta karantiil ka ah waxaa kamid noqon kara goobta ay bixiso dowladda ama hay'adaha dowladeed hadii mid laheli karo.

Amarkani wuxu la jaan qaadaya hagista xaruunta xakamaynta cudurrada, iyo caafimaadka dadweynaha, seattle iyo degmada King County.

Hadii natijjada baaritaankaagu ka soo baxdo COVID-19 markaa waa inaad go'doon ku ahaata.

### **Amarka Go'doominta**

Qof kasta oo natijjo togan ka helay COVID-19 waa in lagu karantiila sida soo socota:

**Haka tagin gurigaaga ama xaruunta kabashada, marka laga reebo inaad hesho daryeel caafimaad.** (Xaruunta kabashada waa meel ay ku hoydaan dadkan oo hadda haysan guryo. Waxaa bixin kara dowladda ama hay'ada dowladeed)

Cid kasta oo leh astaamo, waad **joojin kartaa go'doominta** oo kaliya xaaladaha soo socda.

- Ugu yaraan seddex maalmood (72 saacadood) oo lasoo dhaafay ayaa qandhadu ka tagtagtay adiga oo aan la isticmaalin daawooyinka qandhada yareeya (sida asbirin iyo ayboburofiin) calaamadahaagana ay fiicnaadeen (tusaale, qufaca iyo neefta oo kugu adkaata)
- Ugu yaraan todobo maalmood ayaa dhaافتay tan iyo markii ugu horreysay ee astaamuhu muuqdaan

Qof kasta oo helay natijjo tijaabo oo togon ah COVID-19 laakin aan lahayn wax astaamo ah: jooji go'doominta ugu yaraan todobo maalmood ay dhaafeen taariikhda baaritaanka ugu horreysay ee COVID-19, mana jirin wax xanuun ah todobadaas maalmood.

## **U hogaansanaan**

Qof walba waxaa si weyn loogu hogaaminaya in ay si ikhtiyaar leh u waafaqaan amarkan.

Qof kasta oo u hogaansami waaya waxaa lagu gelin kara xabsi-ku-qasab ah. Waaxda caafimaadka waxay leedahay awoodaan sida uu u qabo sharciga gobalka Washington. [see [RCW 70.05.070 \(2\)-\(3\)](#) and [WAC 246-100-036 \(3\)](#)].